


Iska ilaali in cudur kugu faafo iyo inaad dadka kale cudur ku faafiso



Masaafada ilaali

Si fiican u hubi in aad ku dadaashid in aad ciriiri ka fogaatid iyo in aad masafo u jirsatid dadka kale ee jooga goobaha ay dadka badani isugu yimaadaan, tusaale ahaan dukaannada, xarumaha laga dukaameysto, maqaayadaha, meelaha dibadda ah ee cuntada leesugu keeno iyo meelaha lagu dabaasho.



Badanaaba dhaq gacmahaaga!

Maadooyinka cudurka faafiya waxay si fudud u dhegaan gacmaha oo sidaas ku sii faafi karaan. Badanaaba gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo diiran, ugu yaraan 20 il-biriqsi. Alkahoosha gacmaha wax baddel u ah haddii aanad fursad u haysan gacmo dhaqid.



Ku qufac oo ku hindhis laabka gacanta

In lagu qufaco laguna hindhiso laabka gacanta ama masarka sanko ee warqada ah waxaad kaga hortagaysaa in dhibcaha yar yar ee wata maadada cudur faafinta aanay ku faafin hareerahaaga ama ku dhegin gacmahaaga. Markastaba masarka sanko ee warqada ah ku tuur dembiilka qashinka oo gacmaha dhaq.



Iska ilaali inaad taabato indhaha, sanko iyo afka!

Way adkaan kartaa in la iska daayo, markaas badanaaba gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo si loo tir-tiro maadooyinka cudurka faafinaya.



Guriga joog haddii aad xanuusanayso!

Guriga joog haddii aad xanuusanayso Markaasi waxaad iska ilaalinaysaa inaad cudur ku faafiso dadka kale.



Maadooyinka cudurka faafiya waxaa laga helaa meel kasta oo ka mid ah hareeraheena.

Nadaafada fiican ee gacmaha waa qaab fudud oo aad ku ilaalinayso naftaada iyo dadka kaleba.

Ta ugu badan cudur faafinta waxay dhacdaa oo sii martaa gacmaheena.

